

Infakshanada la isugu gudbiyo qaababka galma - jabtida iyo kalamiidiya (klamydia)

Jabtida iyo kalamiidiya waa infakshano caadi ah, oo la isugu gudbiyo qaababka galma. Waxaa lagu qaadaa marka la sameeyo galmo aan la adeegsan wax badbaado ah (ubeskyttet) waxayna keeni karaan dhibaatooyin caafimaad oo halis ah. Si joogto ah isu baar isticmaalna cinjirka galma (kondhom) si aad isu ilaalo, dadka kalena aad u ilaalo.

Jabti (Gonoré)

- **Jabtidu waa maxay?** Jabtidu waa caabuq la isugu gudbiyo galma, oo ay keento bakteeriyyada *Neisseria gonorrhoeae*.
- **Qaabkee loo qaadaa?** Jabtida waxa la qaadaa marka la sameeyo xirriir galmo, oo ay is taabtaan xuubabka/dahaarada gudaha (*slimhinner*) ee xubnaha taranka, malawadka ama cunaha/dhuunta. Tani waxay dhici kartaa marka la sameynayo galma siilka, dabada ama afka. Waad qaadi kartaa haddii keliya xubnaha taranku ay is taabtaan, tiyoo aan la sameeyn galmo.
- **Calaamadaha:** Calaamadaha caadiga ahi, waa kaadida oo ku gubta marka aad kaadinayo iyo dheecaan. Dad badan, gaar ahaan haweenka da'da yar, ayeey ku dhici kartaa jabtidu iyaga oon arag/dareemin calaamadaha, waana arrin kordhinaysa halista la xirriirta in caabuqu keeno dhibaatooyin dambe (komplikasjoner) sida hurgunka ku dhaca tuubada ugxn-sidaha (eggleder) iyo caabuqa ku dhaca lafta miskaha ee haweenka (bekken). Raggu waxay yeelan karaan hurgunka ku dhaca xiniin-yaraha (bitestikkal). Xaaladda ugu xuni waa inaad noqon karto madhalays.
- **Maxay daaweyntu muhiim u tahay:** Daawayn wakhti hore la billaaba waa muhiim, si loo joojiyo faafintaanka cudurka, loogana hortago dhibaatooyin caafimaad oo halis ah.

Kalamiidiya (klamydia)

- Kalamiidiya waa maxay? Kalamiidiya waa caabuq la isugu gudbiyo galma, oo ay keento bakteeriyyada *Chlamydia trachomatis*.
- **Sidee lagu qaadaa?** Kalamiidiya waxa lagu qaadaa, marka si toos ah ay isu taabtaan xuubabka/dahaarada gudaha (*slimhinner*) ee xubnaha taranka, malawadka ama cunaha. Tani waxay dhici kartaa marka la sameynayo galma siilka, dabada ama afka. Waad qaadi kartaa xataa haddii keliya ay xubnaha taranku ay is taabtaan, tiyoo aan la sameeyn galmo.

- **Calaamadaha:** Calaamadaha caadiga ah, waa kaadida oo ku gubta marka aad kaadinayso, dheecaan, in aad dhiigto galmaada ka dib, iyo sidoo kale in aad xanuun ka dareento xubinta taranka. Dad badan ayaan dareemin wax calaamado ah, waana arrin kordhinaysa halista la xirriirta in caabuqu keeno dhibaatooyin dambe (komplikasjoner) sida hurgunka ku dhaca tuubada ugxn-sidaha (eggleder) iyo caabuqa ku dhaca lafta miskaha ee haweenka (bekken) iyo hurgunka ku dhaca xiniin-yaraha ragga (bitestikkel). Xaaladda ugu daran ee ku soo wajih kartaa, waxa weeye in aad noqon karto madhalays.
- **Maxay daaweyntu muhiim u tahay:** Daawayn wakhti hore la billaaba waa muhiim, si loo joojiyo faafintaanka, loogana hortago dhibaatooyin caafimaad oo halis ah.

Ka hortagga

- **Badbaadada/ is-ilaalinta:** Isticmaalka la isticmaalo cinjirka (kondhomka) inta dhammaan lagu guda jiro falka galmaada, wuxuu ka difaacaa jabtida iyo kalamiidiya. Cinjirrada (kondhomo) bilaashka ah waxaa laga heli karaa xarumaha caafimaadka ee dhalinyarada iyo ardayda dhigata waxbarashada sare (studenter), iyo internetka oo ah www.gratiskondomer.no.
- **Goorma ayeey tahay in aad is baarto?** Haddii aad galmo la samaysay qof cusub iyo/ama haddii aad samaysay galmo aadan isticmaalin wax badbaada ah , sidookale aad u malaynayso in aad qaadi kartay, waa in aad iska baarto jabti ama kalamiidiya laba toddobaad ka dib.

Sidee aaya baaritaanka loo sameeya?

- **Tijaabada kaadida:** Raggu waxay iska baari karaan jabtida iyo kalamiidiya iyaga oo iska qaada tijaabo-kaadi.
- **Tijaabada lagu qaado qoriga yar ee dhuubar (vattpineprøve):** Dumarku wey is baari karaan iyaga oo qoriga yar ee dhuubar soo marmariya siilka. Waxa sidoo kale tijaabooyin laga soo qaadaa cunaha/dhuunta ama malawadka haddii loo baahdo.
- **Jawaabaha/natiijooyinka:** Caadi ahaan waxaad natijada ku heleysaa dhawr maalmood ilaa toddobaad gudihii. Haddi baaritaanku soo sheego in lagaa helay cudurka (positiv), waxaad heli doontaa warbixin ku saabsan daawaynta.

Sidee loo daweyaa jabtida iyo kalamiidiya?

- **Antibiyyotiko:** Jabtida iyo kalamiidiya labadaba waxaa lagu daweyaa antibiyootiko.

- **Ka warhaynta/ la sii socodka:** Daawaynta ka dib, waa muhiim in la sameeyo baadhitaan dabagal ah, si loo hubiyo in caabuqu gabi ahaanba meesha uu ka baxay.

Halkee ayaabaaritaanka la iskaga qaadi karaa?

- **Xarumaha caafimaad ee dhalinyarada (helsestasjoner for ungdom):**
 - Helsestasjon for ungdom og studenter i Bergenhus/Årstad (Rugta caafimaadka dhalinyarada iyo ardayda waxbarashada sare ku jirta ee Bergenhus/Årstad)
 - Helsestasjon for ungdom ved Nesttun helsestasjon (Rugta caafimaadka dhalinyarada ee ku taala rugta caafimaadka ee Nesttun).
 - Helsestasjon for ungdom ved Oasen helsestasjon (Rugta caafimaadka dhalinyarada ee ku taala rugta caafimaadka ee Oasen).
 - Helsestasjon for ungdom i Arna og Åsane (Rugta caafimaadka dhalinyarada ee Arna iyo Åsane).
- **Skolehelsetjenesten:** hos helsesykepleier ved skolen din (Adeegga caafimaadka skoolka: oo ay bixinayso kalkaalisaada guud ee caafimaadka ee skoolka).
- **Poliklinikk for seksuelt overførbare infeksjoner** ved Haukeland Universitetssjukehus (Qaybta buaan-socodka ee cudurrada galmaada lagu kala qaado ee Isbitaalka Jaamacadda Haukeland).
- **Dhakhtarkaa-ga gaarka ah (fastlege)**

Waa meeqa/imisa kharashka daawayntu?

- Iska baarista iyo daawaynta jabtida iyo kalamidiya waa bilaash, marka lala xirriiro goobaha adeega ee kor lagu soo sheegay.